Qaybta labaad ee doorashooyinkii Soomaaliya

Markii ay soo dhammaatay doorashadii labada aqal ee Baarlamaana Soomaaliya waxaa kulli la soo galay Magaalo-madaxda Soomaaliya.

waxaa bilowday in ay musharixiintii ay yana soo galaan magaalo-madaxda ayaga oo ku tartamaya sidii uu mid kasta u heli lahaa meel ku haboon oo sawirkiisa lagu dhejiyo si ay dadku u arkaan loona aqoonsado.

Waxaa bilowday in ay musharixiintu ay raadiyeyaasha iyo Taleefishinada kulamo iyo inay dadka kala hadlaan. isku wadadaroo waxaa aad dhaqdhaqaaq dhaqaale u yeeshay xayeesiinta ka horeysa wareysiyada musharixiinta.

Waxaa la gaaray qaybtii dambe ee doorashada, liiska isqorey inay yihiin musharixiin waxa uu ahaa mid aad u dheer waxaa ka mid ahaa labo gabdhood markii ugu horeysay Soomaaliya inay gabari isu soo taagto doorasho madaxweyne.

Musharixiintu waxa ay kireysteen guryo iyo xarumo waaweyn si ay xildhibaanada ay codka ka rabaan ugula shiraan, islamarkaana ay taageereyaashoodu ugu yimaadaan.

Musharixiintu waxa ay isugu jireen siyaasiyiin hore, siyaasiyiin markaa xilka hayey iyo siyaasiyiin cusub waxaana ugu caansanaa siyaasiyiinta:

1* Hassan Sheikh Mohamoud oo ahaa madaxweynaha hayey xilka

2* Omar Abdirashid Ali Sharmarke oo ah Ra'iisal wasaaraha xilka hayey awalna noqaday Ra'isal wasaare

3* Sheikh Sharif Sheikh Ahmed oo ahaa madax weynihii ka horeeye Hassan Sheikh

4* Mohamed Abdullahi Mohamed Farmajo hore u soo noqday Ra'iisal wasaare

liiku intaa waa ka dheeryahay laakiin waxa aan u soo qaatay 4taan musharax waa maadaama ay ahaayeed adka ugu CV ga culus, dadkuna u arkayeen iney yihiin kuwa fursadda badan.

Hadii aan ka billaabo madaxweyne Xasan waxa uu ahaa madaxweyne 4 sano, waxa uu dhabarka ku hayey Organisation xoogleh, waxana uu lahaa asxaab siyaasadeed oo badan. waxa kale oo uu madaxweynuhu haystay lacag badan, waxana oo soo saaray xildhibaano badan sidaas darteed waxa la qaiyaasayey inuu yahay ninka ugu fursadda fiican.

Sheekh Sharif waxa uu ahaa madaxweyne hore, waa nin ahaa madixii Somali slamic union court, waa nin ahaa madixii jabhadii dib u xoreynta soomaaliya oo ciidamada Ethiopia dalka

dagaalka uga saartay waana nin yaqaan afka soomaaliga iyo diinta hadalkiisuna soo jiidasho leeyahay.

Omar Abdirashid waa siyaasi hadda Ra'iisul wasaare ah, horeyna u soo noqday isla markaana Aabihii soomaaliya ka noqday Madaxweyne iyo Ra'iisul wasaare labadaba Cumar waa nin siyaasad qaboow asxaab badanna ku leh siyaasiyiinta.

Mohamed Farmajo waxa uu soo maray Ra'iisul wasaare, wakhtiigaa uu Ra'isal wasaaraha ahaa ayuu ku guuleystay dowlad wanaag inuu sameeyo, sida inuu mushaarooyinka bixiyo, ciidamada dhaawacmay dhaqaaleeyo, ciidamada magaalooyinka ka sooro, dadka nabada diidan la diriro.

Marka aan dhinaca shacabka Soomaaliyeed fiiriyo waxa aad loo jeclaa waa Sheikh Sharif iyo Mohamed farmaajo oo ay dadku aaminsanaayeen inay isbedel siyaasadeed keeni karaan. Maxaa yeelay marka ay doorashadu dhacaysay shaqaalaha, ciidamada iyo Baarlamaanka Soomaaliya midna mushaar ma qaadan 7bilood.

waxaa kale oo aan ayana meesha ka maqneyn waa Dowladda Ethiopia oo si toos ah ugu hadlaysay ama u dhiirigalineysay in la doorto madaxweyne Hassan Sheikh.

Arintaasna ay tahay mid ay Soomaalidu dhibsatay, maxaa yeelay dadka Soomaalida ah waa dad jecel inay waxooda ayagu sameystaan ee aan lala farogalin. Hadana Soomaaliya iyo Ethiopia waxaa dhex maray taariikho aan u badneyn dhinaca saaxiibnimada. Arintaas waxa ay keentay in xildhibaano uu markii hore Madaxweyne Hassan soosaarey ay isaga diidaan maadaama ay dadka Soomaalidu diidan yihiin cid kasta oo ay Ethiopia wadato.

Waxa laga rabay inuu bixiyo musharax kasta oo ka mid ahaa musharixiinta 30,000.00Usd ah, oo ah registration fee dadka intoodii badnayd waa bixiyeen lacagtaas. musharixiintii aaminsaneyd inay helayaan codadka Baarlamaanka oo kali ah aya isu soo harey si ay uga qaybqaataan 08-02-2017 maalintaas oo ahayd maalin uu qof kasta oo Soomaali ah horfadhiyo TV-ga.

Maalintaas waxa ay ahayd maalin si wanaagsan loo soo agaasimay meel kastana lagu sharaxay calanka buluuga ah oo xidigta shan-geeska ahi ay dhexda uga jirto.

Waxaa la bilaabay doorashadi oo ka dhacaysay Dugsiga tababarka Ciidanka Police ka Somaaliyeed ee loo yaqoono(Schola politie) Waa af-talyaani.

Waxa la galay wareegii koowaad, waxaana isku soo baxay afarta musharax ee dusha ku xusan, waxaana loo gudbay wareegii labaad oo doorashada.

wareegaani waxa uu ahaa mid aad iyo aad u xiiso badan laakiin musharixiintu ay aad u kala baqayeen, waxaa isla markii wareega labaad la tiriyey meesha ku harey Sheikh Sharif Sheikh Ahmed.

Isla wali ayada oo aanla bilaabin wareegii 3aad ayaa waxaa doorashadii ka baxa oo tanasulay Omar Abdirashid oo gartay in labada kale iyo asagu ay aad u kala fogyihin oo uusan gaari karin.

wareegii ugu dambeeyey waxa ay noqotay iney isu soo haraan Madaxweyne Hassan iyo Mohamed Farmajo, ma ahayn wareeg dhib badan ee waxa uu ahaa mid uu Madaxweyne Hassan isdhiibay ayada oo wali codeyntii socoto.

Maalinkaas iyo 3dii Casho oo ka dambeysay waxa ay dadku isaga soo bexeen meel kasta oo afka Soomaaliga looga hadlo sida degmooyin ka mid ah dalka Kenya, Ethiopia iyo dhammaan Soomaaliya oo dhan xitaa Somaliland oo markasta sheegata inay Somaliya ka go'day.

Waxa uu Madaxweyne Farmajo Ra'isul wasaare u doortay nin dhalinyaro ah oo haysta dhalashada waddanka Norway, meesha madaxweynuhu Mareykanka ka yahay.

Howshooda ugu weyn waa Anti corruption iyo dowlad wanaag

Dadku waxa ay ka filayaan dowladdaan wa wax ka badan ama ka weyn waxa ay qaban karto marka laga eego dhinac kasta.

A M Halane